

## **Xuquuqda iyo waajibaadka aad ku baranayso**

Muhaajiriinta haysta ogolaansho degnaansho kaas oo ah asalka degnaanshihiisa/heeda waxay xaq u leeyihiin ama/iyo waajib ku ah inay ka qayb galaan xiisad 300 saacadood oo ah luuqada Noorwiijiyaanka iyo cilmiga bulshada.

Si aad u hesho degnaansho ama muwaadinimada Noorwiijiyaanka, muhaajiriintu waa inay dhameeyaan xiisad 300 saacadood ah ama waa inay leeyihiin aqoon ku filan oo ah Noorwiijiyaan ama Sámi. Tani waxay khusaysaa dadka la siiyey degnaansho rasmi ah wixii ka dambeeyay 1-dii Sibteembar 2005. Xaqa iyo waajibaadka barashada Noorwiijiyaanku ma khusayso muhaajiriinta oo dhan. Wixii macluumaad dheeraad ahi ee ku sahabsan xaqaaga iyo waajibaadka ku saaran kala xidhiidh golaha degaanka ee dawladaada hoose.

Dadkii degnaanshaha rasmiga ah la siiyay wixii ka horeeyay 1-dii Sibteembar 2005, waxay leeyihiin jadwal kala guur ah. Dadka uu khuseeyo jadwalka kala guurka ahi waxay xaq u leeyihiin xiisad afka Noorwiijiyaanka ah oo bilaash ah ilaa 1-da Sibteembar ee 2010, markaas oo wixii ka dambeeya ay iska bixin doonaan lacagta xiisadaha Noorwiijiyaanka. Xiisado bilaash ah ayaa la siinayaa ku aan wali xuquuqdoodii xiisad bilaash ah.